

Wasaaradda Caafimaadka

Tallaalkaaga COVID-19 Kadib

Nooca 2.0 29^{ka} Maarso, 2021

Maxaan filan karaa dhowrka maalmood ee nagu soo xiga?

- Waxyeelooyinka caadiga ah ee ka dhalan kara waxaa ka mid ah xanuun, gaduudasho, barar aad ku aragto goobta cirbadda tallaalka lagaa siiyay, daal, madax-xanuun, muruq xanuun, qarqar, xanuun isgalka, iyo qandho yar.
- Waxyeelada ugu daran waa kuwa dhif ah. Dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada caafimaadka wac ama tag waaxda adeegga deg-degga ee kuugu soo dhow haddii aad isku aragto xaaladdaha falcelin ee soo socda midkood inta lagu jiro seddexda maalmood markaad tallaalka hesho: cuncun, barar wajiga ama afka ah, dhibaato neefsasho, midab aad u cirro badan iyo lulumo daran, qandho sareysa (dhaafsiisan 40°C), qalal ama suuxid, ama calaamaddo kale oo daran (tusaale ahaan “cirbaddayn iyo cirbad” ama kabaabasho).
- Tallaalka AstraZeneca/COVISHIELD waxaa la la xiriiriyaa waxyeello aad dhif u ah ee loo yaqaano [Vaccine-Induced Prothrombotic Immune Thrombocytopenia \(VIPIT\)](#). Haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamaddaha soo socda markaad hesho tallaalka ka dib fadlan markiiba raadso daawayn: neefta oo yaraata, xanuun dhanka xabadka/shafka, barar ama qabow dhanka garabka ama lugta, calool xanuun joogta ah, madax-xanuun daran ama ka sii daraya ama aragti ceryaamo leh, ama buusan dhowr ah oo yaryar, dhibco gaduud ama guduud ah ama maqaarka hoostiisa oo biyo gala.

Ma in aan weli raaca talooyinka caafimaadka dadwaynaha ee COVID-19?

- Tallaalku waa qaab dheeraad ah oo aad isaga ilaalin karto cudurka COVID-19. Labada qiyaas tallaalka COVID-19 midkood waa in aad sii wadataa in aad raacdo talooyinka cudurka COVID-19, sida xirashada maaskaha, ku dhaqmida ka fogaanshaha dadka iyo gacmahaaga oo aad dhaqdo.
- La sodo calaamaddaha xanuunka COVID-19 oo iska baar haddii aad isku aragto calaamaddaha.

Goorma ayaan u noqonayaa qaadashadayda qiyaasta labaad?

- Waxaad u baahan tahay laba qiyaasood oo tallaal ah si aad si buuxda iskaga difaacdo. Haddii ay tani tahay qiyaastaada koowaad ee tallaalka COVID-19, iska xaqiiji in aad qiyaasta labaad ee tallaalkaaga aad hesho sida ay kugu faraan rugta ama barta aad iska qortay. Rasiidka tallaalkaaga oo daabacan ee lagu siiyay maanta horey u keen maalinta ballaantaada labaad.